

Nolol wacan qof kasta

Gargaarka ehelka



**Göteborgs
Stad**



Information om
anhörigstöd på
somaliska.

Ma gargaareysaa qof?

**Waxan dooneynaa inaan
ku caawino!**

Adiga gargaaraya qof ehela

Ma jiraa qof aad ehel tihiin, da´ yar ama da´ wayn (waayeel), kaasoo cudur haya dartiis, si xun u isticmaalid maandooriye, balwad, curyaanimo jireed ama mid miskaxeed (nafsiyadeed) dartood u baahan kaalmadaada?

Qofka ehelka ayaa noqon kara xubin reerka ka mida, qaraabo, deris ama saaxiib wanaagsan. Adiga ehelka ahi muhim baad tahay waxadna heysaa howl muhim ah! Mararka qaar waxad u baahan kartaa gargaar.

Shaqadeenu waxay ku salaysan tahay sharciga adeegga bulshada cutubka 5 10\$: *"Gudiga bulshada ayaa bixinaya gargaar si howsha loogu sahlo dadka daryeela qof ehela kaasoo mudo dheer jiranaa ama da'a ah ama gargaaraya qof naafa ah."*

Halkan ayaad ka aqrisan kartaa wax intaa dheer ee gargaarka ehelka:

www.goteborg.se

www.socialstyrelsen.se

Ma dooneysaa inaad qof kala hadasho arintaada?

Göteborgs Stad waxay leedahay dad ka shaqeeya kaalmada ehelka. Waxaad u tegi kartaa iyaga si aad u heshid warbixin, talo iyo kaalmo. Kaalmada ehelka waxaa loo bixin karaa adeeg ahaan tusaale ahaan wada hadal qofka lala yeesho, khudbado, waxbarasho, kooxo ka kooban dad ehelkooda caawiya ama in qofka laga caawiyo inuu la xiriiro meel sax ah. Haddii aad u baahan tahay turjumaan noocuu yahayba waan kuu qabanaynaa. Qofka kaalmada bixinaya iyo kan kaalmada u baahan labaduba waxay xaq u leeyihiin inay iskood kaalmo uga codsadaan xafiiska adeegga bulshada. Waxay tusaale ahaan noqon kartaa hawl ka nasin guriga marka la joogo, hawl maalmeed ama wax kale oo qofka loo qabto.

Kaalmadu waa inay noqoto mid shaqsiya ku haboon.




Kusoo dhawow inaad la xiriirtid la taliye ehel

Wixii warbixin intaa dheer oo ku saabsan kaalmada ehelka iyo noocyada kaalmooyinka kala duwan waxaad ka heli kartaa la taliye ehel.

Telefoon: 031-365 00 00 Xarunta lala xriiro

Ma kaalmaysaa qof **ka yar 65 sano** raadi la taliye ehel oo ka shaqeeya Göteborgs Stad. Ma kaalmaysaa qof **65 sano ka wayn** ka raadi qof la taliye ehel ah halka aad deggan tahay ama halka qofka ehelka aad tihiin deggan yahay. Waxaad sidoo kale Iskan ku samayn kartaa koodhka QR ee hoose ama gal www.goteborg.se/anhorigstodnaradig si aad usii akhrisid wixii intaa dheer oo ku saabsan kaalmada ehelka. Dooro "Kontakt" si aad u heshid halka laga la xiriiro qof la taliye ehel ah.



Xiriirkeyga
